



Qaybta Falanqaynta Hubinta
Cuntada ee Somalia

Hubinta Cuntada iyo Nafaqada

Warbixinta Kooban ee February 2005

Waxa la soo saaray
February 15, 2005

Tilmaamaha: Qiimaynta Xilliga Deyrta 2004/05 Kadib ee FSAU

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha

Gobolka ee

Soo

shaacbaxaya

Cinwaanka: FSAU -
Somalia

Kalson Towers,
Parklands

Box 1230 Village Market

Nairobi, Kenya

Tilifoonka : +254 20 374
5734

Faakiska: +254 20 374 5098

Email: fsauinfo@fsau.or.ke

www.unsomalia.net/fsau/


Bilihii December/January, FSAU iyadoo la kaashatay FEWSNET iyo hay'adaha kale ee ay isbahaystaan waxay tafatirtay qiimaynteedii sannadka ee Deyrta kadib ee cuntada, nafaqada iyo hab-nololeedka ee dhammaan Soomaaliya. Qiimayntani waxay cusboonaysiisay falanqayntii Guga kadib ee FSAU ay soo bandhigtay September, 2004 (eeg Warbixinta Taxanaha ee Farsamada Lambar IV.2 " , kadib natiijadii roobabkii Deyrta 2004/05. Toddoba iyo toban hay'adood oo ka tirsan Jimciyadda Quruumaha ka Dhaxaysa, ururrada aan dawliga ee caalamiga ah iyo kuwa dalka iyo maamulada Soomaalida ayaa ka qaybqaatay howlaha qiimaynta ee gudaha dalka. Natiijooyin hordhac ah ayaa dib loola eegay daneeyayaasha kulamo heer gobol ah oo lagu qabtay Soomaaliya iyo kuwo lagula yeeshay Nairobi hay'ado dalka ah iyo ururro caalami ah oo isbahaysi lala leeyahay. Warbixinta buuxda waxa lagu soo saari doonaa Taxanaha Farsamada ee FSAU badhtamaha bishan February.

Natiijooyinka Muhiimka ah

- Roobab aad u fiican oo ka da'ay Deyrta 2004/05 dhammaan Soomaaliya waxay keeneen soosaar midhaha ah oo ka badan celceliska badi dhulka midhaha soosaarka (marka laga reebo midhaha ay waxyeeladu ku gaadhay Jubba iyo Shabeelle), waxana ay joojiyeen abaar ka jirtay Waqooyiga in ka badan 3 sano. Inkastoo ay jireen roobabkaas wanaagsani, haddana waxa jira dad lagu qiyaasay **500,000 oo weli ku jira xaalad ah Gurmad Bina-aadamnimo ama Hab-nololeedka oo Cidhiidhi ah**. Kooxahaasi waxay u baahanyihiin kaalmo bina-aadamnimo ah oo degdega ah oo lagu siiyo hanti loo wareejiyo iyo taageero xagga hab-nololeedka ah (eeg sanduuqa 1 iyo Khariidadda 1).

Wararka ugu muhiimsan Gobolada

- **Waqooyiga Soomaaliya**, roobabkii Deyrtii 2004/05 waxay joojiyeen abaar ku wareegaysay gobolka in ka badan 3 sano, laakiin marka la eego waxyaabaha badan ee naxdinta leh ee ka dhacaya gobolka (ee ay ku jiraan abaar, roobab baraf ah, daadad iyo Sunaami), oo ay weheliyaan heerka dhibaatada loo gaysto deegaanka, tiro badan oo ka dhimatay xoolaha, heerarka deynka dadka lagu leeyahay oo aad u sarreeya, iyo dad badan oo barokacay. Sidaas darteed wakhti badan ayay ku qaadan doontaa badi xoola-dhaqatadu inay dib u soo kabtaan. Dad lagu qiyaasay 84,000 ayaa u baahan kaalmo bina'aadamnimo oo degdeg ah, dad kale oo tiradoodu ay dhantahay 158,000 waxay u baahanyihiin taageero hab-nololeedka ah gobolada Bari, Nugal, Sanag, Sool and Togdheer. Inta ay ku qaadan doonto xoola-dhaqatadu inay dib u soo kabtaan iyo cidda dib u soo kaban doontaa waxy badi ku xidhnaan doontaa natiijada ka soo baxda roobabka la filayo xilliyada Guga iyo Deyrta ee sannadka 2005-2006.
- **Badhtamaha Soomaaliya** waxa si joogto ah u jirta nabad la'aan taasoo dib u soo noqonaysa oo mijo-xaabinaysa faa'iidooyinka laga helay roobabkii fiincnaa ee da'ay Deyrtii 2004/05, oo qasaysa suuqyada isla markaana xaddidaysa fursadaha daaqa iyo saadka kale ee gobolka. Dad lagu qiyaasay 61,000 oo qof ayaa Mudug iyo Galgaduud wali u baahan kaalmo xagga bina-aadamnimada ah. Dibaatooyinka la xidhiidha inaan la tegi karin gobolkaasi waxay sii xumayn doontaa xaaladda.
- **Koonfurta Soomaaliya**, roobabka ka badan sida caadiga ah ee da'ay Deyrtii 2004/05 waxay suurto geliyeen dib u soo kabashada aadka loogu baahnaa badi gobolkaasi. Xoola-dhaqatadu waxay ka faa'iidaystaan daaqa iyo biyaha soo cusoobnaaday. Soosaarka xoolaha iyo habka ay u guuraanna waa caadi. Beeralayda iyo dadka beeralayda iyo xoola-dhaqatada isugu jira ee beera hadhuudhka roobka biyaha ka helaa waxay ka faa'iidaystaan mid ka mid ah kuwa ugu sarreeya heerarka soosaarka ee Deyrta tobankii sano ee la soo dhaafay. Hase yeeshee, roobabkii badnaa iyo daadadkii ka dhacay webiyaasha Jubba iyo Shabeelle waxay keeneen mid ka mid xiliyadii ugu xumaa ee soosaarka gallyada kaasoo ah boqolkiiba 46, 45, iyo 51 celceliska dagaalka kadib ee soosaarka gallyada Deyrta ee Jubbada Hoose iyo Dhexe, Shabeelada Dhexe iyo Shabeelada Hoose. Dhinaca wanaagsan, soosaar dheeraad ah oo ah midho iyo dalagga lacagta laga helo ayaa la filayaa inay ka soo



Wakhtiyada Xilliyada ee Soomaaliya & Dhacdooyinka Muhiimka ah

baxaan daadadkii iyo biyihii roobabka. Burbur ayaa ku dhacay keydkii midhaha ee dhulka hoostiisa ku jiray meelaha webiyada ku hareeraysan.

- **Webiga Jubba hareerihisa iyo Waqooyiga Gedo**, waxay ku jiraan xaalad gurmada bina-aadaminimo ah oo sii socota, oo taabanaysa dad lagu qiyaasay 195,000. Labadaas meelood waxay leeyihiin heerarka nafaqodarrada ee la diiwaangeliyey ee ugu sarreeya dalka, kuwaas oo aad u xagjira makra loo eego heerarka caalamiga ah. Labadaas gooboodba waxa ka jirta hubin la'aan cuntada ah oo aad u xun iyo macaluul, taasoo ay weheliyaan waxyaabaha naxdinta leh ee dhacay Deyrtii 2004/05 (sida daadad burburiyey in ka badan kala badh midhihii gallyada ee ka soo baxay xilligan Jubba, iyo nabad la'aan ka jirta Juba iyo Gedo). Kaalmo bina-aadaminimo oo degdeg ahi waa lagama maarmaan, taasoo ay weheliso taageero mudada dheer ah oo wax ka tarta sababaha keenaya dhibaatooyinka.
- **Dad badan oo Gudaha Dalka Ku Barakacsan**, oo tiradooda lagu qiyaasay 376,000 dadkaasi (Soosaaraha warka: FSAU Taxanaha Farsamada Lambar IV.2 Falanqaynta Guga Kadib, September 21, 2004) waxay ku filiqsanyihiin soddon iyo afar xero oo dalka oo dhan ah, kuwaas oo ah koox gaar ah oo nugul oo u baahan kaalmo bina-aadaminimo (eeg Khariidadda 1).

Falanqaynta Qaybaha

Nabad la'anta

- Inkastoo tallaabooyinka guud ee laga qaaday abuuritaanka Dawladda Kumeelgaadhka ah ee Federaaliga ah ay tahay inay ugu dambaynta keenaan horumar xagga hubinta cuntada iyo hab-nololeedka dadka Soomaaliyeed ee nugul, waxa jira walaac laga qabo in tallaabooyinka kumeelgaadhka ahi ay keeni karaan in colaaddu ay sii korodho maaddaama dadka qaarkood ay xoojinayaan meesha ay taaganyihiin ama ay ka horjeedsanayaan maamulada cusub.
- Marka la eego xidhiidhaha tooska ah ee ka dhexeeya colaadda iyo hubinta cuntada, iyo marka la eego awoodda la hubiyey ee ay colaaddu u leedahay in dabkeedu uu ku shidmo muddo gaaban, muhiim ayay u tahay hay'adaha bina-aadaminimadu inay xusaan inay u dhici karto hubin la'aan cuntada ahi sannadka soo socda.

Cimilada

- Derytii 2004/05 roobabku waxay uga da'een si siman oo aad u wanaagsan dhammaan Soomaaliya. Badi goboladu waxay heleen qiyaasta roobka in u dhaxaysa 100-200 oo Mili Mitir (mm), iyadoo meelaha qaarkoodna ay heleen illaa 400 mm.
- Marka la isku daro roobabkii Deyrta 2004/05 waxay ka badnaayeen roobka caadiga ah boqolkiiba 160 -300 in ka badan gobollada Waqooyiga iyo Koonfurta iyo goobo ka mid ah gobollada Dhexe.
- Dhammaan Soomaaliya faraqa caadiga ah ee u dhexeeya tilmaamaha daaqa wuu ka sarreeyaa heerka caadiga ah kadib roobabkii Deryta 2004/05.
- Roobabka da'ay ee ka badan sida caadiga ahi waxay cusboonaysiiyeen daaqa iyo saadka biyaha oo hore u maray meelaha xoola-dhaqatada iyo beeralaya iyo xoola-dhaqatada isku jira dhammaan dalka.
- Inkastoo roobabka sida caadiga ah ka badani ay taageereen kordhinta soosaarka midhaha guud ahaan, haddana meelaha ku hareeraysan webiyaasha Jubba iyo Shabeelle waxa qaaday daad kaasoo keenay in waxyeello weyni ay gaadhay midhaha iyo kaydii ku jiray dhulka hoostiisa.

Soosaarka Midhaha iyo Isu-dheelitirka Sannadka ee Midhaha


- Deyrta 2004/05 soosaarka midhaha ee koonfurta Soomaaliya waxa lagu qiyaasay 122,400 ee qiyaasta Mitirik Tan (MT), taasoo boqolkiiba 121 ka sarraysa qiyaasta celceliska ah ee dagaalkii kadib isla markaana ah soosaarkii saddexaad ee ugu fiicnaa Deryta taniyo 1995.
- *Karantii* 2004 soosaarkii midhaha (December 2004) ee dhulka xoola-dhaqatada iyo beeralaya iyo xoola-dhaqatada isku jira ee Awdal, Galbeed iyo Togdheer way fiicnayd waxaana lagu qiyaasay 17,100 MT, iyadoo ka fiican boqolkiiba 17 qiyaasta celceliska ah ee dagaalkii kadib.
- Soosaarka hadhuudhku wuu ka sarreeyaa sida caadiga ah, hadhuudhka ayaana ugu badnaa soosaarka midhaha ee *Deyrta* 2004/05. Daadadka roobka iyo webiyaasha ee ku soo rogmaday hareeraha webiyaasha Shabeelle iyo Jubba, waxay keeneen inay si weyn waxyeello u gaadhay gallyada taasina waxay keentay, in soosaarka gallyadu uu ka yaryahay kala badh sida caadiga ah ama boqolkiiba 46 qiyaasta celceliska ah ee dagaalkii kadib ee soosaarka gallyada ee xilliga Deyrta.
- Isku-darka soosaarka midhaha beeraha ee sannadkan 2004/05 (Gugii iyo Karantii sannadkii 2004 iyo Deyrta 2004/05 marka la isku daro) waxa lagu qiyaasay 264,800 MT, taasoo ah boqolkiiba 93 qiyaasta celceliska ah ee dagaalkii kadib, waxa se weeye boqolkiiba 54 keliya marka loo eego qiyaastii dagaalka ka hor (1982-1988).
- Isu-dheelitirka Midhaha Sannadkii ee Soomaaliya 2004/05, oo lagu jaangooyey soosaarkii dhabta ahaa ee midhaha ee Deyrta 2004/05 iyo Karantii 2004, waxay muujinaysaa faraq ka dhiman midhaha loo haahanyahay kaasoo lagu qiyaasay 8,000 MT, waxana weeye boqolkiiba 2 iskudarka qiyaasta midhaha loo baahanyahay. Hase yeeshee, faraqani waxa qudha oo uu qiyaasayaa guudahaan waxa la hayo oo loo eegyo waxa dadweynuhu ay u baahanyihiin, laakiin sharax kama bixinayo dhibaatooyinka helitaanka cuntada ee la xidhiidha gurmada bina-aadaminimada ama hab-nololeedka oo cidhiidhi ah.

Falanqaynta Suuqa – Heerka Sarrifka Lacagta, Dhoofinta Xoolaha iyo Qiimaha Midhaha

- Shilinka Somaliland iyo Shilinka Soomaaliya qiimahoodu sidaa isumay bedelin marka loo eego Doolarka Maraykanka xiligii Deyrta 2004/05, Sarrifka Doolarku marka loo eego shilinka Soomaaliya wuxuu u dhexeeyey 15,000-16,500, shilinka Somaliland wuxuu ahaa 6,000-6,500 sarrifka Doolarka.
- Labada lacagoodba, intii u dhaxayaysay April iyo Sept 2004, waxay muujiyeen inay heleen faa'iido badan. Shilinka Soomaaliya wuxuu faa'iiday boqolkiiba 33, Shilinka Somalilandna boqolkiiba 29 ayuu kordhay.

Falanqaynta La isu geeyey ee Hubina Cuntada: Kadib Deyrtii 2004

Khariidadda 1: Falanqaynta Cuntada, Nafaqada & Hab-nololeedka Kadib Deyrta (January 2005)



qimaynta deyrti kadib

Sanduuga 1: Kadib Deyrtii 2004 Qiyaasaha Tirada Dadka Baahan u baahan kaalmo

GOBOL	Dadweynaha Gobolka	Qiyaasaha Gugii 2004			Qiyaasaha Deyrtii 2004 / 05		
		Hab-nololeedka oo Cidhiidhi ah	Gurmada Bina-aadannimo (Heerka 2)	Isku-darka Dadka Baahan oo ah % Isku-darka guud ee Dadweynaha	Hab-nololeedka oo Cidhiidhi ah	Gurmada Bina-aadannimo (Heerka 2)	Isku-darka Dadka Baahan oo ah % Isku-darka Dadweynaha
Waqooyi							
Bari	266,450	38,000	25,000	24	29,000	24,000	
Nugaal	113,265	24,000	10,000	30	14,000	8,000	
Sanaag	190,455	47,000	30,000	40	37,000	26,000	
Sool	194,660	34,000	28,000	32	30,000	26,000	
Togdheer	302,155	79,000	0	26	48,000	0	
Isku-dar hore	1,066,985	222,000	93,000	30	158,000	84,000	
Dhexe							
Galgaduud	275,720	13,000	30,000	16	13,000	25,000	
Mudug	251,520	30,000	14,000	17	11,000	12,000	
Isku-dar hore	527,240	43,000	44,000	17	24,000	37,000	
Koonfur							
Bakool	215,180	15,000	0	7	0	0	
Gedo	385,380	59,000	53,000	29	59,000	53,000	
Jubbada Hoose	329,240	59,000	0	18	0	30,000	
Jubbada Dhexe	248,620	62,000	53,000	46	0	53,000	
Isku-dar hore	1,178,420	195,000	106,000	26	59,000	136,000	
Isku-dar guud	2,772,645	460,000	243,000	25	241,000	257,000	
Isku darka tirada dadka baahan		703,000			498,000		

Warka dadweynaha ku saabsan waxa laga helay: WHO iyo UNICEF howlaha taageerada tallaalka (2002). Tirada waxa lagu soo koobay kunka ugu dhow waxana ay muujinaysaa in falanqayntu ay ku salaysantahay qiyaas iyo inay yihiin tiro qorshayn ah

Qiimaynta Xilliga Deyrta Kadib 2004/05 ee FSAU

Hase yeeshee labada lacagoodba, wali qiimahoodu wuu hooseeyaa marka loo eego heerarkii sannadkii 2000, Shilin Soomaaligu wuxuu hooseeyaa boqolkiiba 49 ka Somalilandna wuxuu hooseeyaa boqolkiiba 54.

- Adhi ka yare badan 2 malyuun ayaa dibedda loo dhoofiyeey sannadkii 2004, taasoo la mid ah tiradii la dhoofiyeey sannadkii 2003. Tirada adhiga la dhoofiyeey, hase yeeshee waxay ka yartahay in ka badan hal malyuun intii la dhoofiyeey ka hor mamnuucidda lagu soo rogay dhoofinta xoolaha sannadkii 1998. Sannadkan 2005, Dekedda Bosasso ayaa laga dhoofiyeey badi xoolahaas, taasoo ka duwan mamnuucidda ka hor markaas oo Berbera ay ahayd dekedda u weyn ee xoolaha laga dhoofiyo.
- Qiimaha riyaha la dhoofiyeey wuu ka sarreeyey sannadkan siduu ahaa muddo dhowr sannadood ah (wuxuu u dhexeeyey 26 – 34 doolarka Maraykanka). Heerka iswaydaarsiga ganacsiga ee u dhexeeya bariiska iyo riyaha teyada dhoofinta lehi wuu ka fiicanyahay siduu ahaa sannadkii 1998 ka hor xilliga mamnuucidda dhoofinta xoolaha. Tusaale ahaan, heerka bariisku wuxuu u dhexeeyaa 65-94 Kiiloo garaam halkii ri ee teyadiidu tahay doofinta marka loo eego 50-56 kiilo garaam sannadkii 1998.
- Qiimaha midhaha ee badi suuqyadu hoos ayuu u dhacay taniyo markii uu heerka u sarreeya gaadhay bilihii July-August 2004. Qiimaha hadhuudhka waxa la filayaa inuu hoos u sii dhaco kadib soosaarka midhaha ee aan caadiga ahayn ee xilligii Deryta 2004/05, iyadoo qiimaha gallyaydu uu u eegayahay inuu si isdabajoog ah u kordhi doono sababtoo ah waxa lagu guulaysan waayay soosaarka gallyayda.

Nafaqada

- Goobo ka mid ah Waqooyiga (Taleex, Xuddur, Dadka Barokacay ee Boosaaso jooga, iyo Dangoroyo) iyo Badhtamaha (Dhuusamareeb, Cadado, iyo Caabudwaaq) waxay ku wadaan in heerarka nafaqadaradu ay aad u xuntahay si weynna uga sarraysa heerka caadiga ah.
- Waqooyiga Gedo, iyo bulshooyinka dega heereeraha webiga Jubba waxay ku wadaan inay leeyihiin heerarka macaluusha ee ugu sarreeya uguna xun dalka, taasoo ka badan boqolkiiba 20 wadarta guud ee macaluusha ee hadda taagan.

Waxyeelada Sunaamiga



Waxa sawirka qaaday: Guddigii qiimayntii 1aad

Sunaamigu wuxuu ka dhacay xeebta waqooyi bari laga billaabo Xaafuun oo ka tirsan Gobolka Bari illaa tuulada Garacad oo ka tirsan Mudug saacaddu markay ahayd 11:30 subaxnimo 26kii December 2004. Kadib qiimayn degdeg ah oo hay'aduhu ay wadajir u sameeyeen kadib Sunaamiga, booqasho qiimayn ah oo tii hore ka tafatiran ayaa la sameeyey 28kii January – 9kii February 2005 (waxa lala sameeyey OCHA oo ay FSAU wadaagaan guddoominta guddiga xaqiiq raadinta). Qiimayntu waxay tilmaantay faraqa u dhaxeeya kaalmada bina-aadamnimada iyo baahida loo qabo mudada dheer in laga soo kabto hab-nololeedka iyadoo la eegayo qaybo kala duwan (caafimaadka; cuntada; nafaqada iyo hubinta hab-nololeedka; kalluumaysiga; biyaha iyo nadaafadda; hoyga iyo mashaariicda; waxbarashada iyo maamulka. Waxyaabaha gaarka ah ee lagu ogaaday qiimaynta waxa loo soo bandhigi doonaa Kooxda Jawaabcelinta Bina-aadamnimada 25ka February, 2005.



Waxa sawirka qaaday: John Clarke, WHO 2005



Waxa sawirka qaaday: FSAU 2005



Technical and Managerial Support



Funding Agencies



Technical Partners

